Somali Public Agenda

Faallo Kooban 14

Sebteembar 2021

Soo koobid

Siyaasadaha, barnaamijyada, iyo mashaariicda la naqshadeeyo, ee la hirgaliyo si ay ugu adeegaan baahida muwaadiniinta Soomaaliyeed ayaa badanaa ku guuldareysta ujeedooyinkooda. Nasiib darro, arrintani waa mid aad u baahsan, iyadoo marar badan la sheego in la fududeysto in ay tahay qeyb u baahan fiiro gaar ah in loo yeesho. Waxaa jira awoodo fara badan oo goobta shaqada ah, kuwaasoo caqabad ku noqda in la dejiyo siyaasad hagaagsan. Si kastaba, xitaa dowladaha leh hay'ado si wanaagsan u shaqeynaya oo dimuqraadi ah (sida Canada iyo Denmark) ayaa ogaaday siyaasadaha la naqshadeeyo ayadoo wadashaqeyn dhaw lala yeelanayo dadweynaha in ay abuuri karaan isbeddel la taaban karo, maxalli ah, dadweynaha ka turjumaya, ugu dambeyntiina xal waxtar ah leh, kaasoo "marka naqshadaynta xagga sare laga keeno" aanu ka guul keeni karin. Xarumaha Naqshadeynaya Siyaasadaha waa halabuurro cusub oo ay adeegsato dunida oo dhan— kuwaas oo haddii xoogaa halabuur iyo hirgelin laysugu daro u horseedi kara horumar la taaban karo Soomaaliya iyo xitaa gobolka oo dhan. Qoraalkan kooban wuxuu sharraxayaa sida fikirka naqshadaynta siyaasaddu u kobcay adduunka iyo kaalinta ballaaran ee Xarumaha Naqshadeynta Siyaasadda. Intaa kadib waxa uu diiradda saarayaa baahiyaha gaarka ah oo ay Soomaaliya wajaheyso iyo kaalinta Somali Public Agenda Center for Public Policy and Service Design ay u taagan tahay in ay cayaarto.

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.org

© 2021 Somali Public Agenda

Howlgalinta Xarumo Naqshadeeya Siyaasadaha oo Isku-xira Siyaasada Dowladda iyo Baahida Dadweynaha Soomaaliya

Aweys Axmed Maxamed

Hordhac: Soo Ifbaxa Hababka Naqshadeynta Siyaasadda

Naqshadeynta siyaasadda iyo adeegyadda loogu talagalay dadweynaha dal waxaa ku badan madaxda maamulka dowladda. Taa cagsigeeda, muwaadiniinta oo ah kuwa loogu talagalay adeegyadda dowladda ayaa waxa ay si dhif ah ugu lug-yeeshaan ama ra'yi ku biiriyaan qorsheyaasha siyaasadda loogu adeegayo (Nesti, 2018). Arrinkaan ayaa soo taagnaa tan iyo markii la aasaasay hannaanka dowladda casriga ah iyo qeybta lagu daraasadeeyo maamulka howlaha dowladda. Si kastaba, horumar la taaban karo oo ku saabsan naqshad hal-abuur, oo lagu saleeyay baahida dadweynaha loo adeegayo, ayaa waxa ay horseedday dardar xoog leh oo ku soo korodhay ganacsiyada gaarka loo leeyahay. Arrinkan markii la gareystay waxa uu horseeday soo ifbixii 'Maareynta Howlaha Dadweynaha ee Casriga ah' 'New Public Management' waqti ku aadan tobaneeyaddii sanadood ee ugu dambeeyay qarnigii labaatanaad. Mid kamid ah astaamaha uu lasoo baxay Maareynta Howlaha Dadweynaha ee Casriga ah' ayaa waxa ay aheyd in diiradda la saaro siyaasaddo ay udub-dhexaad u yihiin dadweynaha ay dowladdu adeegga u sameyneyso. Arrinkan waxaa ka dhalanaya in haya'daha dowladda laga yeelo sida qeybaha ganacsiga gaarka ah ay u shaqeeyaan si sare loogu qaado awooddooda dhinacyo kala duwan, gaar ahaan naqshadeynta siyaasadaha iyo adeegyada ay bixiyaan, ayadoo mudnaan weyn la siinayo muwaadiniinta, oo ah cidda loo adeegayo.

Waxaa lagu doodi karaa in dowladaha in ay sameeyeen horumaro marka la eego gaabisyada ku aaddanaa xal u hellida dhibaatooyinka dadweynaha marka la barbardhigo ganacsiyada gaarka loo leeyahay. Waxa ay ahaataba, baaxadda natiijadda horumarradda ay sameysay qeybta maamusha howlaha dowladda ayaa aad u koobnaa sababo la xirriira turaanturrooyin xooggan oo kaga yimid ku dabaqidda tusaalooyinka iyo hababka lagasoo amaahday ganacsiyada gaarka loo leeyahay. Carqaladahaasi waxa ay isugu jiraan: in sida ganacsiga gaarka loo maamulo howlaha dowladda; adeeg bixinta in lagu tartansiiyo haya'daha adeegga bixiya ee dowladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay; baahinta maamulka oo sababtay kala filiqsanaanta howlaha dowladda; ayadoo duni aad isugu miiqan la joogo, in kaliya diiradda la saaro 'sida ugu wanaagsan ee la isla yaqaan'; iyo fursadaha teknolojiyadda ee hadda jira oo sare u qaadaya baahiyaha kala duwan ee muwaadiniinta iyo haya'daha gaarka ah ee daneeya adeegga dowladda (Torfing, et el., 2020). Arrimahan ayaa ahaa waxyaabihii soo dadajiyay isbadalka labaad ee kala wareegga ah kaasoo ku dhacay maamulka dowliga ah (Torfing, et al., 2020). Sidaas awgeed 'Maareynta Howlaha Dadweynaha ee Casriga ah' waxaa bedelay 'Maamulka Dowliga ee Casriga ah'. Arrinkani waxa uu soo kordhiyay habab cusub oo lagula tacaalo caqabadaha casriga ah oo uu wajahayso qeybta maamusha howlaha dadweynaha.

Maamulka Dowliga ee Casriga ah waxa uu soo kordhiyay aragtida ah in la isla abuuro siyaasado xal u keena gaarsiinta adeegga dadweynaha, halkaasoo haya'adaha dowladda ay iskaashanayaan, halka ay ka tartami lahaayeen jilaayaal badan oo aan dowli aheyn, oo ay ku jiraan urruradda aan macaash doonka ahayn, bulshada rayidka ama muwaadiniinta, si ay u helaan dhibaatooyinka ku xeeran howlaha dadweynaha loo qabto, islamarkaana ay ugu naqshadeeyaan xalal aad la isugu halleyn karo (Torfing, et al., 2016). Waxa uu sare u qaaday in xoogga la saaro 'sida wanaagsan ee la isla yaqaan si ka duwan oo ka sii hormarsan' kaasoo ka gudbaya habka la isla yaqiin ee naqshadeynta siyaasadda, islamarkaana

xoojinaya in la joogteeyo habab halabuur leh kuwaas oo baadigooba siyaasaddo xal keena mustaqbalka. Sidoo kale, Maamulka Dowliga ee Casriga ah waxa uu si adag xoogga u saaray ku lug lahaanshaha joogtada ah ee dadweynaha loo adeegayo – kuwaasoo markii hore loo arki jiray dad aan saameyn laheyn – marka la joogo isla-abuurida iyo isla-naqshadeynta xalal hal abuur leh oo ku aaddan qeybaha siyaasada ee kala duwan. Intaa waxaa dheer, soo ifbaxa Xarumaha Naqshadeynta Siyaasadda oo sidoo kale loo garan ogyahay Public Sector Innovation Labs, Innovation Labs, Public Policy Labs, ama Policy Labs, ayaa waxaa loo tixgeliyaa in ay yihiin mid kamid ah hababka uu soo kordhiyay Maamulka Dowliga ee Casriga ah si uu u xoojiyo awoodda naqshadeynta siyaasadda ee qeybta maamusha howlaha dadweynaha.

Dhanka Xalku Jiro: Xarumaha Naqshadeynta Siyaasadda

Xarumaha Naqshadeynta Siyaasadda ama Laababka Siyaasadda ayaa waxa si aad ah u abuurayay labaatankii sano ee ugu dambeeyay dowladda, haya'daha macaash doonka ah ama kuwa aan aheyn (Lewis, 2021). Xarumaha naqshadeeya siyaasadda waa aalado dowladaha ka caawiya si ay xal ugu helaan caqabadaha kaga imaanaya adeegsiga hababka soo jireenka ah ee joogtada ahaa oo lagu aqoonsan jiray dhibaatooyinka bulshada heysta, kuwaasoo u baahan in lagu wajaho siyaasado xalliya oo hal-abuur leh, iyadoo la adeegsanayo habab tijaabo iyo 'Fikirka Naqshadeyn' leh. Xarumaha Naqshadeynta Siyaasadda waxa ay leeyihiin nuucyo ka la duwan, xiriirka ay la leeyihiin dowldaha, ururrada caalamiga ah iyo haya'daha ayaa midba kan kale ka duwan. Mararka qaar waxaa aasaasa dowladaha sida ka jirta Denmark iyo Boqorooyada Ingiriiska; waxa ay ku oolli karaan jaamacadaha sida ka jirta Australia iyo Mareykanka; iyo waxaa dhici kara in ay noqdaan hay'ado gaar ah oo macaash doon ah ama aan macaash doon aheyn. Haya'daha cilmibaarista ayaa waxa ay ahaayeen kuwa aad uga muuqda hay'adaha aan dowliga aheyn ee siyaasadda wax ka dejiya, kuwaasoo qeyb ka ahaa hannaanka dejinta siyaasadda ku dhowaad nus qarni. Dabcan, marka si dhaw loo eego nuucyada kala duwan ee haya'daha cilmibaarista, Xarumaha Naqshadeynta Siyaasadda waxaa loo arki karaa in ay qeyb ahaan ku habboon yihiin in halkan lagu xisaabiyo.

Si kastaba, inkastoo ay Xarumaha Naqshadeynta Siyaasadda iyo haya'daha cilmibaarista si guud ay dhinacyo u wadaagaan, haddana XNS waxa ay gaar u leeyihiin in aysan kaliya qaban shaqada cilmibaarista ah balse ay la falgalaan saraakiil sar sare oo dowladda ah sida laga arki karo, tusaale ahaan, haya'daha sida Brookings, Center for Strategic and International Studies (CSIS), ama Chatham House. Waxa ay badanaan si dhow ula shaqeeyaan dadweynaha si ay afkaar uga curiyaan howlaha cusub, u gartaan dhibaatooyinka, qaabeeyaan xalal, naqshadeeyaan tallaabooyin cusub oo suuragal ah, tijaabiyaan, si rasmi ahna u howlgaliyaan, gacan ka geystaan la ekeysiinta iyo ka shaqeysiinta xalalka. Marka ay sidaa tahay, Xarumaha Naqshadeynta Siyaasadda waxa ay noqonayaan 'haya'd fikir iyo tallaabo qaadis leh' taas oo u taagan hab cusub oo aqoonta siyaasadda howlaha dadweynaha lagu yeelayo mid ficil ah (McGann, et al., 2021). Arrinkan wada shaqeynta dhaw ah ayaa waxa ay yeelan kartaa faa'idooyin qotodheer, oo badanaa aan la siin qiimaha ay mudan yihiin, waxaana kamid ah:

- Waxa ay ka caawin kartaa in la garto oo mudnaan la siiyo dhibaatada dhabta ah iyo caqabadaha jira, halka taa beddelkeeda hadda muhimada laysugu geeyo waxyaabo malo lagu saleeyay oo ay dejiyeen dad aan aqoon durugsan u laheyn howsha.
- Xalalka suuragalka ah waxa ay noqon karaan kuwo loo sii bandhigo dadweynaha si ay wax uga dhahaan ka hor inta aan hirgelinta siyaasaddaasi qarash fara badan la gelin, si looga hortago in dhibaatada la ogaado marka xaqiiqda lasoo taabto.
- Waxa ay ka caawin kartaa in meesha laga saaro aragtiyaha kaga sii dari kara xaaladda in tixgelin la siiyo — sababtoo ah howsha xarumaha nuucan ah waa mid xogo cadeyn leh ku saleysan— oo waxa ay si xeelad leh u caawin kartaa in meesha laga saaro aragtida aad ugu janjeerta siyaasadda, taasoo aad loogu yaqaan siyaasad dejinta, balse aan noqonin mid waxtar leh (ama, kaga sii dari karta xaaladda dhibaatada) haddii hanti la geliyo oo laga shaqeysiiyo.

Xarumaha Naqshadeynta Siyaasadda waxa ay cayaaraan kaalinta xarumo ay wax ku bartaan shaqaalaha rayidka ah ee ka shaqeeya qeybta howlaha dadweynaha, halkaasoo ay ku horumarin karaan awooddooda la xirriirta dib-u-qaabeynta dhibaatooyinka howlaha dadweynaha loo qabto heysta, naqshadeynta iyo curinta habab cusub oo lagu xalliyo dhibaatooyinkaas. Taa waxaa dheer, xarumahan waxa ay fududeeyaan iskaashi dhexmara dowladda iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay, maadaama ay lagama maarmaan tahay si joogta ah ay u wadahadalaan.

Macaamiisha Xarumaha Naqshadeynta Siyaasadda kuma koobna oo keliya haya'daha dowladda balse waxa ay adeeg qiimo badan gaarsiiyaan haya'daha caalamiga ah, iyagoo ka caawiya dejinta siyaasaddo iyo barnaamijyo ballaaran oo ku aadan dalalka soo koraya, haddii ay tahay barnaamijyadda iyo siyaasadaha nabadda iyo aminga la xiriira, horumarinta ama qeybaha gargaarka bini'aadamnimada la xirriira. XNS badanaa waxa ay shaqadooda ka bilaabaan in ay fahmaan nuxurka dhibaatada jirta, dib-u-qaabeyna ku sameeya iyagoo adeegsanaya khubaradooda siyaasad dejinta yaqaana iyo waaya aragnimadda dadweynaha dhibaatadu ay heysato, si ay uga caawiyaan isku xirka baahiyahooda iyo siyaasadaha dowladda.

Xarumahan waxa ay siiyaan macaamiishooda – oo noqon kara dowladaha iyo jilayaasha caalamiga ah – talooyin wata xogo cadeymo leh kuwaasoo ka caawinaya in ay ka hortaagaan go'aamo khaldan oo la xiriira siyaasadaha iyo maalgashiyadda in ay qaataan. XNS waxa ay adeegsadaan habab cilmibaariseed oo kala duwan marka ay sameynayaan hannaanka naqshadeynta iyo halabuurka. Habka ugu horreeya ee inta badanna adeegsadaan XNS waa habka naqshdeynta lagu saleeyo baahida dadweynaha, kaasoo loo adeegsado in goobta dadku ku noolyihiin la tago oo waqti lala qaato, in dadka la wareysto ama iyaga oo koox ah dood-wadaag loo sameeyo iyo in dadweynaha waaya aragnimadooda adeegga loo fidiyay lagu tijaabiyo aalado. Habka labaad ee cilimaariseed waa habka xogaha cadeymaha leh loo uruuriyo iyo midka ugu dambeeya oo ah habka Agile-ka loo yaqaan (McGann, et al., 2021). XNS ayaa illaa iyo hadda waxtarkooda la arkay, waxa ayna isbeddel ku keenen naqshadeynta barnaamijyadda iyo siyaasadaha ee maamulka dadweynaha dalal fara badan, gaar ahaan kuwa Galbeedka.

Xarumaha Naqshadeynta Siyaasadda oo Wadashaqeeya iyo in laga Hirgeliyo Soomaaliya

Kadib in ka badan labaatan sanadood oo colaad la isku xiiqay taasoo burburisay haya'dihii dowladda, kaabayaasha dhaqaalaha, adeegyadda dadweynaha ee lagama maarmaanka ahaa, islamarkaana abuurtay khasaare aad u weyn oo ku yimid dadkii aqoonta lahaa, Soomaaliya waxa ay gashay waa cusub oo yara nabad iyo xasilooni ah tan iyo 2012-kii. Arrintan ayaa timid kadib markii Muqdisho lagu doortay dowladdii ugu horreysay ee aan kumeelgaar aheyn, dastuur kumeelgaar ahna la meelmariyay. Markii lasoo afjaray xilligii dheeraaday ee dowladda kumeelgaarka aheyd ee nidaamka federaalka hirgelintiisana la ambaqaaday, dalku waxa uu galay xalaad dib-u-kabasho iyo dib-u-dhis aayar aayar ah. Balse haya'adaha dowladdu weli waxa ay ku jiraan maraxalad bilow ah, waxa ayna si weyn ugu tiirsan yihiin kaalmo farsamo iyo mid dhaqaale isugu jirta oo uga timaada haya'adaha caalaimga ah ee horumarinta ka caawiya Soomaaliya. Intaas waxaa dheer, waxaa aad u xadiidan awoodda xagga aqoonta iyo xirfadda ee

shaqalaha rayidka, marka la eego xirfadaha lagama maarmaanka ah ee ay tahay in lagu hormariso halabuuro casri ah si loo xalliyo dhibaatooyinka ku geedaaman qeybta howlaha dadweynaha ka shaqeysa.

Mashruuca xoojinta iyo kor-u-qaadida qeybta maamusha howlaha dadweynaha ee Soomaaliya ayaa la billaabay sanadkii 2015-ka, waxa uuna socdaa dhowr sano si loo kaabo gaaabiska xagga shaqaalaha xirfadda leh ee ka shaqeeya qeybta bixisa adeegyadda dowladda. Dowladda ayaa waxa ay weli la tacaaleysaa in ay abuurto kalsoonida iyo aaminaadda muwaadiniinta, taasoo ay ugu wacan tahay awood yarida qeybta maamulka dadweynaha ee la xiriirta bixinta adeeg waxtar leh, islamarkaana horumariyaan siyaasad ka tarjumeysa baahida dadweynaha iyo sidoo kale in ay dabagal iyo kormeer ku sameeyaan fulinta mashaariicda iyo siyaasadaha dadweynaha. Sidaas awgeed, waxaa jira isku-xirnaan la'aan weyn oo u dhexeeysa siyaasadaha dowladda iyo muwaadiniinta helaya adeegyada iyo natiijooyinka ka dhasha siyaasadahaas. Isku-xirnaan la'aantan ayaa u baahan in la xalliyo ayadoo la adeegsanayo hab lagu horumarinayo howlaha dadweynaha oo xirfad fikir iyo ficil isugu jira. Xirfadahani waxa ay isugu jiraan naqshadeynta siyaasadda iyo adeegga; farsamooyin hal-abuur leh oo ay Soomaaliya soo kordhin karto si qarash iyo waqti kooban ah, ayadoo loo marayo xarumaha sida Xarunta Naqshadeynta Siyaasadda iyo Adeegga Dadweynaha SPA (SPA-Center for Public Policy and Service Design).

Xarunta Naqshadeynta Siyaasadda iyo Adeegga Dadweynaha ee SPA ayadoo adeegsaneysa xiriirrada ay la leedahay caalamka iyo dadyowga ku xiran ee qeybtan xirfadda sare u leh, waxa ay kusoo kordhineysaa adeeg cusub oo waxtar leh gobolka Geeska oo dhan. Intaas waxaa dheer, Soomaaliya waxa ay qaadatay nidaamka federaalka ah kaasoo adeegyada lagama maarmaanka u ah dadweynaha ay tahay in la gaarsiiyo heeraarka federaalka, dowlad goboleedka iyo dowladaha hoose. Heer walba adeeg bixintiisu waxa uu yeelanayaa qaab-dhismeed ballaaran oo hab cusub ku saleysan maaddaama qaab-dhismeedkii hore ee dowladda dhexe ku saleysnaa uu burbur ku yimid xilligii dagaalka sokeeye. Waxaa jiri doonta baahi aad u ballaaran oo la xiriirta naqshadeynta adeegyada si waafaqsan qaab-dhismeedka cusub ee federaalka, halka Xarumaha Naqshadeynta Siyaasadda iyo Adeegga Dadweynaha ay noqon karaan haya'ado muhiim ah oo kaalintaan buuxin kara.

Amaandarrada iyo xasillooni-darradda siyaadadeed oo uu keenay dagaalka hubeysan iyo musiibooyinka dabiiciga ah ee iskasoo daba laalaabtay ayaa sidoo kale sababay dhibaatooyin bini'aadamnimo oo joogto ah. Gargaarka bini'aadamnimada iyo horumarinta ayaa sanado badan dalka kusoo qulqulayay. Tirada rasmiga ah ee gargaarka ay Soomaaliya heshay ayaa lagu qiyaasay ku dhawaad labo bilyan oo doolarka Mareykanka ah sanadka 2019-ka (Federal Government of Somalia, 2020). Inkastoo la badbaadiyay nolosha dad badan, haddana waxtarka gargaarka la bixiyay uu u leeyahay dib-u-soo-kabashada mustaqbalka fog iyo horumarka dhaqaale ee degaanka ka jira ayaa u baahan in dib loo qiimeeyo. Caqabad weyn oo hortaagan waxtarka gargaarka ayaa waxaa lagu tilmaami karaa maqnaanshaha ama daciifnimada dhismayaasha hay'adaha dowladda ee shaqeynaya, kuwaasoo lagama maarmaan u ah bixinta adeegyada dadweynaha oo waxtar leh.

Hay'adaha bini'aadamnimada iyo horumarinta ku howlan ayaa ku tiirsanaa qaab-dhismeedkooda iyagoo kaashanaya NGO-yada maxalliga ah iyo hoggaamiyeyaasha bulshada si ay u bixiyaan adeegyada lagama maarmaanka ah (Medinilla, et al., 2019). Inta badan siyaasadaha iyo adeegyada lasoo mariyo hay'adahaan waxaa naqshadeeya xirfadlayaal ajnabi ah oo aan awoodin inay la falgalaan dadka maxalliga ah, islamarkaana aqoon ku filan aan u lahayn xaqiiqda iyo dhaqanka dhabta ah ee ka jirta degaanka. Inkastoo ay wax weyn ka tareyso badqabka malaayiin Soomaali ah, siyaasadaha iyo adeegyada noocan oo kale ah ayaa loo diyaarin karaa qaab ka waxtarsan sida ay yihiin, oo ka turjumaya baahida dhabta ah ee dadka adeegga la siinayo, kaasoo saamayn togan ku yeelan kara mustaqbalka fog. Haddaba, waxaa loo baahan yahay xarumo naqshadeeya siyaasadda in si dhaqsi ah lagu helo, kuwaasoo awood u leh in ay horumariyaan hab-naqshadeyn adeeg iyo siyaasad oo ay udub-dhexaad u tahay baahida dadweynaha. Tusaale ahaan, Machadka Qaramada Midoobay ee Cilmibaarista Hub-ka-dhigista ayaa waxa uu aqoonsaday saddex iyo toban caqabado oo ku wajahan in si guul ah loo ogaado baahiyaha siyaasadda, islamarkaana xalal loo naqshadeeyo bahiyahaasi, iyo fulinta naqshadahaas la dejiyay. Inkastoo ay dhammaan caqabadahaas la xiriiraan Soomaaliya, haddana waxan halkan xoogga ku saareynaa kuwa hoos ku qoran:

- **Isla xisaabtanka oo laga doorbido saameynta:** Waxaa waqti badan la geliyaa abuuridda wax la cabiri karo, islamarkaana warbixin laga bixin karo, halka ay aheyd in xoogga la saaro waxa loo baahan yahay ee lagama maarmaanka ah.
- **Qorsheynta oo laga doorbido naqshadeynta:** Badanaa waxaa dhacda in xirfadleyaasha ay ka cararaan "dhibtaada taagan iyagoo u carara qosheynta sababtoo ah waxa ay maleeyaan in ay hore u arkeen dhibaatada taagan mid la mid ah, halka ay ka aheyd in ay madal siiyaan dhibaatada taagan si dhab ah oo ka tarjumeysa deegaanka, si cayiman oo xitaa ku aaddan caqabadaha dhaqameed ee sida dhabta ah u wajahayan. Nasiib darro, iyagoo ka kor tallabsanaya wejiga naqshadeynta, waxaa suuragal ah in ay hoos ugu daadagayaan wadada khaldan.
- **Iskaahshi aan jiho laheyn:** Hay'ad walba waxa ay adeegsataa qaabaab maamul u gaar ah oo lagula xisaabtamo (haddii ay tahay dalal, haya'addo, urruro iyo kuwa kale), arrintanina waxa ay ku keenta iskaashiga dhinacyada xaalad adag. Balse, haddii loo naqshadeyn lahaa si wadajir ah, waxa ay u shaqeyn kari lahaayeen iyagoo heysta faham isku mid ah, kadibna waxa ay ku celin lahaayeen qaab-dhismeedyada maamulkooda, qaabab micne u sameynaya, aadna u fududeynaya in lagu wada shaqeynta hal waddo.

Iyadoo arrimaha kor ku xusan maanka lagu hayo, xal-u-helidda naqshadeynta siyaasadda iyo adeegyada ayaa waxa ay keeni karaan wax-ku-biirin ay Soomaalidu hormuud ka tahay. Xarumaha naqshadeynta siyaasadaha ee Soomaaliya ee adeegsada shaqaale kala duwan oo kala ah naqshadeeyayaal, cilmibaareyaal, iyo khubaro farsamo ayaa waxa ay ku kordhin karaan qiimo aad u weyn dejinta siyaasadaha iyo adeegyada guud ee Soomaaliya. XNS waxa ay la shaqeyn karaan hay'adaha dowladda, waxa ayna ka caawin karaan in ay abuuraan hal-abuurro cusub si ay u xalliyaan dhibaatooyinka heysta dadweynaha, islamarkaana u gaarsiiyaan adeeg wanaagsan. Sidoo kale, waxaa suuragal ah in ay u shaqeyaan sida xarumo isku xira dadka sameeya siyaasadda oo ah kuwa wax ku dhisa aragtiyo awaal ah iyo aragtiyaha muwaadiniinta ee ku dhisan dhabta deegaanka taalla oo waxqabad u baahan. Xarumuhu waxa ay dhisi karaan iskaashi xooggan oo ay la yeeshaan qaar kamid ah hay'adaha dowladda iyo ururrada deeqaha bixiya ee calaamiga ah ama hay'adaha kuwaasoo ka shaqeeya siyaasado wadajir ah, iyagoo farta ku godaya, falanqeynayana dhibaatooyinka bulshada ku gedaaman, oo ay ka eegayaan dhincayo kala duwan, hal-abuur la imaanayaan, tijaabinayaan, misna abuurayaan tusaaleyaal ay ku dabaqaan xaladaha dhabta ah ee degaanka ka jira.

Mashruuca xoojinta iyo kor-u-qaadida qeybta maamusha howlaha dadweynaha ee Soomaaliya, oo loogu talagalay si sare loogu qaado awoodda xirfadeed ee shaqaalaha haya'adaha heer dowlad-goboleed iyo heer federal, ayaa tusaale loosoo qaadan karaa sida xarumaha caynkan ah ay sare ugu qaadi karaan naqshadeynta siyaasadaha iyagoo u qaabeynaya dhibaatooyinka jira si ka duwan sidii hore. Mashruuca xoojinta iyo kor-u-qaadida xirfadda shaqaalah dowladda ayaa soo socday tan iyo sanadka 2015, waxaana loo qoondeeyay miisaaniyad gaareysa US$ 40 million, sida uu sheegay Bankiga Adduunka. Xarumaha Naqshadeynta Siyaasadda ayaa waxa ay ka caawin karaan dowladda iyo saxiibbada caalamka in loo naqshdeyo Soomaaliya mashaariic lamid ah kan, iyadoo la adeegsanayo hannaan uu udub-dhexaad u yahay baahidda dadweynaha adeegga loo qabanayo.

XNS wxa ay si dhaw ula shaqeyn karaan ururrada deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah iyo hay'adaha kale maaddaama ay leeyihiin nidaam warcelin leh oo la xiriira gaarsiinta adeegyadda. Marka lagasoo tago qaab-dhismeedkooda adeegga la xiriira, kaasoo shaqeynayay muddo fog, haddana xarumaha naqshadeynta siyaasadda waxa ay ka kaalmeyn karaan in ay qaabeeyaan xalal ku aaddan dhibaatooyinka dadweynaha soo wajaha iyagoo isku biirinaya kooxaha dadka ugu nugul, uguna baahida badan, islamarkaana naqshadeynaya tallaabooyin wax-ku-ool ah iyagoo adeegsanaya hannaan uu udub-dhexaad u yahay baahida dadweynaha adeegga loo qabanayo. Xarumaha nuucan ah ayaa shaqadan qaban kara sababtoo ah awoodda xirfadeed ee ay u leeyihiin in ay adeegsadaan habab cilmibaariseed oo kala duwan, oo ay ku gartaan, ku abuuraan, kuna dabaqaan aqoonta dadka deegaanka, halka hay'adaha caalamiga ah ay badanaa si barbaridhig ah ugu dabaqaan siyaasadaha loo dejiyay dalal kale. Badanaa waxaa dhacda in xal miro-dhal ah aysan noqon marka lagu dabaqo hannaan naqshadeed iskumid ah, halka jilaayaasha maxalliga ah, dhaqanka iyo luqaddaba ay ku kala duwan yihiin. Haddii xitaa hay'ad deeq-bixiye caalami ah ay isku daydo in ay qaabeyso naqshad siyaasadeed ku habboon dadka deegaanka ah, waxa suuragal ah in kharashka ku baxaya uu si weyn uga bato marka la barbardhigo qarashka suuragalka ah ee uga bixi kara xarumo naqashadeeya siyaasadda oo maxalli ah. Sidaas awgeed, waxa lagama maarmaan ah in isbeddel lagu sameeyo naqshadeynta siyaasadda oo ah mid dusha sare lagaga keenayo dadka deegaanka, taasoo ay hoggaaminayaan khubaro caalami ah, iyadoo loo beddelayo mid hogganeedu maxalli yahay oo hoos ka imaaneysa, dusha sarena u socota.

Tusaalaha ugu mihiimsan ee loosoo qaadan karo sida xarumaha naqshadeynta siyaasadda ee maxalliga ah ay u cayaari karaan kaalin muhiim ah waxaa laga arki karaa mashruuca Baxnaano. Maashruucan waxaa lagu diyaariyay, hoggaanna looga dhigay magaca Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, balse Hay'adaha Qaramada Midoobay ayaa maamula hawlgalka iyo hirgelinta mashruuca oo loo qoondeeyay wadarta miisaaniyad dhan US$ 65 million (World Bank, 2019). Mashruucaan ayaa soo socday tan iyo sanadka 2019, iyadoo ku talagalku yahay in la siiyo lacag caddaan ah dadka saboolka ah iyo dadka nugul, si loo kordhiyo u adkeysigooda marka ay wajahaan dhibaatooyinka bini'aadamnimo ee daba dheeraaday. Lacagta loogu talagalay mashruucan waa mid kamid ah halbeegyada 'kaalmada bulshada loogu talagalay in xaaladaha adag ee soo wajaha lagu hagaajiyo' taas oo siyaasad-dejiyeyaasha dalal badani ay u tixgeliyaan badbaadinta bulshada ay la soo deristay xaaladaha daran (O'Brien, et al., 2018). Si kastaba, Soomaaliya marka la joogo, halka naqshadeynta mashruuca loo qaabeeyay in lacag caddaan ah la siiyo dadka maxaa yeelay siyaasad-dejiyeyaasha dalal kale ayaa tijaabiyay, waxaa mashruuca Baxnaano looga faa'iideyn karay in lala kaashado xarumaha naqshadeeya siyaasadda ee maxalliga ah oo keeni lahaa habab ka tarjumaya xaaladda iyo baahiyaha dhabta ah si loogu guuleysto xal ka wanaagsan midkii hore.

Maaddaama qeybinta lacagtu ay tahay habka keliya ee badbaadinta bulshada ee mashruucan, Xarumaha Naqshadeynta Siyaasaddu waxa ay ka caawin kari lahaayeen in ay ku biiriyaan dhincayo kale oo fara badan sida maamulka iyo habka ay u heli lahaayeen waxyaabaha lagama maarmaanka u ah noloshooda. Waxaa in la ogaado lagama maarmaan ah in siinta lacagaha caddaanka ah keliya aysan noqon karin habka ugu waxtarsan. Hase ahaatee, isku darka lacagaha caddaanka ah iyo alaab iyo adeeg ama dakhli abuur looga hortago xaaladaha adag ayaa waxa ay noqon laheyd mid aad ugasii habboon. Tusaale ahaan, Soomaalidu waxaa la sheegaa in ay yihiin dad firfircoon oo hal abuur leh iyo ganacsato han leh oo meel hoose ah wax ka billaabi kara. Halka kaliya lacag caddaan looga qeybin lahaa dadka nugul iyagoo qarashgareynaya muddo kooban, XNS waxa ay la falgali lahaayeen dadka wax la siinayo, waxa ayna naqshadeyn lahaayeen hab si ka habboon uga jawaabaya baahiyaha ka jira deegaanka, habkaas oo xoojin lahaa fursadaha dadka nugul ay wax ku kasban karaan muddada fog ee mustaqbalka.

In laga Shaqeysiiyo XNS ee Soomaaliya

Somali Public Agenda waxa ay howlgalisay Xarunta Naqshadeynta Siyaasadda iyo Adeegga Dowladda, waxaana ujeedkoodu yahay in xarunta ay horumariso hab-dhaqanka naqashadeynta oo si wadajir ah looga dhaqangelinayo Soomaaliya. Xarunta ayaa hadda waxa ay dhiseysaa shabakad khubaro ah oo ka caawinaya in ay noqoto xarun hormuud u ah hal-abuurka Soomaaliya. Waxa ay dhiseysaa xiriirro ay la yeelan doonto xarumaha kale ee laababka siyaasada ah ee dunida ka jira si ay u wadaagaan hababka cilmibaarista iyo khubarada, iyo in ay noqoto mid ku xiran oo la jaanqaadda doodaha waxtarka leh ee dunida ka taagan ee aadka ula xiriira siyaasadda guud. Intaa waxaa dheer, xaruntu waxa ay ku howlan tahay in ay dadaalladan isugu keento wacyiga hay'adaha dowladda iyo sidoo kale jilaayaasha caalamiga ah kuwaasoo wadaaga aragti isku mid ah oo ku aaddan xalalka dejinta siyaasadda iyo barnaamijyada oo wax-ku-ool ah, islamarkaana u qalma qarashka ku baxaya.

Tixraac

Federal Government of Somalia, 2020. Aid Flows in Somalia. *MInistry of Planning, Investment and Economic Development,* pp. 1-21.

Lewis, J. M., 2021. The limits of policy labs: characteristics, opportunities and constraints. *Policy Design and Practice,* 4(2), pp. 242-251.

McGann, M., Wells, T. & Blomkamp, E., 2021. Innovation labs and co-production in public problem solving. *Public Management Review,* 23(2), pp. 297-316.

Medinilla, A., Shiferaw, L. T. & Veron, P., 2019. Think local. Governance, Humanitarian Aid, Development and Peace Building in Somalia. *ECPDM Discussion Paper ,* Issue 246.

Nesti, G., 2018. Co-production for innovation: the urban living lab experience. *Policy and Society,* 37(3), pp. Pages 310-325.

O'Brien, C., Holmes, R., Scott, Z. & Barca, V., 2018. Shock-Responsive Social Protection Systems Toolkit—Appraising the use of social protection in addressing large-scale shocks. *Oxford Policy Management, Oxford, UK.*

Torfing, J., Andersen, L. B., Greve, C. & Klausen, K. K., 2020. Public governance paradigms: competing and co-existing. *Edward Elgar Publishing,* pp. 9-17.

Torfing, J., Røiseland, A. & Sørensen, E., 2016. Transforming the Public Sector into an Arena for Co-Creation: Barriers, Drivers, Benefits, and Ways Forward. *Administration & Society,* pp. 7-11..

World Bank, 2019. *Federal Republic of Somalia- Shock Responsive Safety Net for Human Capital Project*. [Online] Available at: https://www.worldbank.org/en/news/loans-credits/2019/08/08/federal-republic-of-somalia-shock-responsive-safety-net-for-human-capital-project